

U SINAANTA SHAQAALAHA IYO QALABYADA

Si waafaqsan sharciga federaalka ee Xeerka Guusha Arday Kasto (ESSA), Gudiga Waxbarashada waxa uu farayaa in adeegyada dugsiyada iyo barnaamijyada Title I, marka la qaato guud ahaan, waa in si weyn loo barbar dhigo adeegyada dugsiyada iyo barnaamijyada aan helin lacagta Title I. Tan waxaa ka mid ah qalabyada manhajka, agabyada waxbarashada, iyo shaqaalaha (macalimiinta, maamulayaasha, iyo shaqaalaha kale).

Kormeeraha guud ee dugsiyada waa inuu raaca habraaca Waaxda Waxbarashada Gobolka si uu u go'aamiyo u dhigmida sanad walbo, oo uu uga warbixiyo gudiga, marka la codsado heerka dugsiyada degmada iyadoo la eegaayo u dhigmida. Degmada waa inay haysaa diiwaanada la cusboonaysiiyo sanadkiiba mar, iyadoo diiwaangelinayo wax u dhigmida.

Cabashooyinka ku saabsan hirgelinta degmada ee shuruudaha u dhigmida waa in lagu xaliyaa si waafaqsan siyaasada Gudiga 1900.

Tixraac aan Siyaasada Ka qaybgalka Waalidka iyo Qoyska (1900)
toos aheyn:

Tixraac: 20 USC §6321(c); Qaybta 1118(c)(2)(A) ee Xeerka waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (ESEA), sida uu waxka bedelo Arday Kasto oo ku Guulaysto Xeerka (ESSA)

Xasuus qoraal: La qaatay August 20, 1998; Wax laga bedelay Decembar 16, 2013 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2013-14: 388; Wax laga bedelay January 26, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 438; Dib loo eegay Juun 26, 2025 iyadoo wax laga bedelin sida waafaqsan Qaraarka No. 2024-25: 884

ct/sg